LGfL SafeguardED

**SOMALI TRANSLATION of the Department for Education statutory guidance for schools and colleges:**

## Keeping children safe in education 2024

## Part one: Information for all school and college staff

Find KCSIE Part 1 translated into 13 community languages at **kcsietranslate.lgfl.net**

NB This translation goes up to and includes the diagram on page 22 on the full version of part one

Department for Education

# Dhawrista badqabka carrruurta waxbarashada ku jirta 2024

## Tusmada sharciga ah ee dugsiyada iyo kuleejyada

**2-da Sibteembar 2022**

# Nuxurka

## Sharciga tusmadaan

Tani waa tusmada sharciga oo ka soo baxday Waaxda Waxbarashada ('Waaxda') oo lagu soo saaray Qeybta 175 ee Sharciga Waxbarashada 2002 (sida wax laga baddalay), Xeerarka Waxbarashada (Heerarka Dugsiyada Madaxa bannaan) 2014, Shuruucda Dugsiyada Gaarka ah ee Aan Dowlada aheyn (England) 2015 iyo Tababarada, Xirfadaha, Carruurta iyo Sharciga Waxbarashada 2009 (sida wax laga baddalay). Dugsiyada iyo kuleejyada England waxaa **qasab** ku ah in ay tixgeliyaan marka ay gudanayaan waajibaadkooda ah ilaalinta iyo horumarinta daryeelka carruurta. Ujeedooyinka tusmadaan awgeed carruurta waxaa kamid ah qof kasta oo kayar da'da 18.

## Xog ku saabsan tusmadaan

Waxaan isticmaalnaa kalmadda **"waa qasab"** iyo **"waa in"** dhammaan tusmada. Waxaan isticmaalnaa kalmadda "**waa qasab**" marka qofka ay khusayso si sharci ah looga baahan yahay inuu wax qabto, iyo "**waa in**" marka talada la dejiyo la raaco haddii aysan jirin sabab macquul ah oo aan loo baahnayn. Tusmada **waa in** lala akhriyaa:

- tusmada sharciga ah Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Ilaalinta Carruurta), iyo
- aalad waaxeedka What to do if you're worried a child is being abused: advice (Waxa la sameeyo haddii aad ka walwalsan tahay in ilmo lagu xadgudbo: talo) for practitioners (ku socota dhakhaatiirta)

**Haddii aan si kale loo sheegin:**

- '**dugsi**' waxa loola jeedaa: dhammaan dugsiyada hadday yihiin kuwo dowlad, kuwa aan duwali ahayn ama kuwa madaxbannaan (oo ay ku jiraan akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo akadeemiyada wax bixinta beddelka ah), dugsiyada xannaanada duwaliga ah[1]iyo qaybaha tixraaca ardayda.
- '**kuleej**' waxaa loola jeedaa waa kulliyado waxbarasho oo dheeraad ah iyo kulliyado qaab lixaad ah sida lagu aasaasay Sharciga Waxbarashada Dheeraadka iyo Waxbarashada Sare ee 1992 iyo machadyada loo qoondeeyay inay ku jiraan qaybta waxbarashada dheeraadka ah.[2] Kuleejka waxaa kaloo loola jeedaa bixiyayaasha Waxbarashada 16 ka dambaysa sida lagu hagaajiyay Tababarada, Xirfadaha, Carruurta iyo Sharciga Waxbarashada 2009 (sida lagu saxay).[3] Akadeemiga 16-19, xarumaha Gaarka ah ee 16-19 ka dambaysa iyo Bixiyeyaasha Tababarka Madaxbanaan. Wixii ku saabsan kuliyadaha,

[1] Early Years Foundation Stage Framework (Qaabdhismeedka Heerka Aasaaska Sannadaha Hore) (EYFS) qasab ayuu ku yahay bixiyayaasha sannadka hore. Waxay khusaysaa dhammaan dugsiyada, oo ay ku jiraan dugsiyada xannaanada dawlada ee leh bixinta sannadaha hore. Dugsiyada xannaanada dawlada, sida dugsiyada kale ee ku hoos qoran 'Ku saabsan tusmadaan', waa iney tixgeliyaan iney carruurtu ku Suganyihiin badbaado waxbarasha marka ay gudanayaan waajibaadka ilaalinta iyo horumarinta daryeelka carruurta (iyadoo loo eegayo farqadda 175(2) ee xeerka waxbarashada 2002 – eeg qoraalka hoosaadka 19 si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo kusaabsan shuruudahan).
[2] Sida ku cad farqadda 28 ee Sharciga Waxbarashada Dheeraadka ah iyo Sare ee 1992 ('xarumaha la magacaabay').
[3] Apprenticeships, Skills, Children and Learning Act 2009 (as amended) (Tababarada, Xirfadaha, Carruurta iyo Sharciga Waxbarashada 2009 (sida lagu saxay))

tusmadaan ayaa la xiriirtaa mas'uuliyadooda waxbarasho ama tababar ee ku wajahan carruurta ee xarumahan.

## Dhibanayaasha iyo dembiilayaasha eedeysan

Ujeedada tusmadaan, waxaan u isticmaalnaa kalmada '**dhibane**'. Waa kalmad si ballaaran loo aqoonsado loona fahmo. Waxaa muhiim ah in dugsiyada iyo kuliyaduhu u aqoonsadaan in qof kasta oo lagu xadgudbay uusan isku heysan dhibane ama aanu rabin in sidaas lagu sifeeyo. Ugu dambayntii, dugsiyada iyo kulliyadaha waa in ay ka digtoonaadaan arrintan marka ay maamulayaan dhacdo kasta islamarkaana u diyaar garoobaan in ay isticmaalaan kalmad kasta oo ilmuhu ugu raaxaysanayo.

Wixii khuseeya ujedada tusmadaan, annagu, meelaha, aan isticmaalnaa kalmada '**dambiilayaasha lagu eedeeyay**' iyo halka ay ku habboon tahay '**dembiilayaasha**'. Kuwani si ballaaran ayaa loo isticmaalaa ama loo aqoonsanyahay islamarkaana sida ugu habboon ee lagu caawinayo diyaarinta tusmada wax ku oolka ah. Haseyeeshee, dugsiyada iyo kuliyadaha waa inay si taxaddar leh uga fakaraan kalmada, gaar ahaan marka ay ka hor hadlayaan carruur, yeysan ahaan ugu yaraan mararka qaar in habdhaqanka aflagaadada ay sidoo kale waxyeello ku tahay dambiilayaasha. Sida sare ku xusan, isticmaalka kalmada habboon waxaa go'aaminaya dugsiyada iyo kulyadaha, sida ay kolba ugu habboontahay, taas oo kiisaska ku saleysan.

## Yaa loogu tala galay tusmadaan

**tusmadaan sharciga ah waa in loo akhriyaa oo ay raacaan:**

- **hay'adaha maamulka dugsiyada dowlada** (oo ay ku jiraan dugsiyada xanaanada dowlada) iyo kulliyadaha kuwaasoo ay ku jiraan bixiyeyaasha waxbarashada 16 ka dambaysa sida ku cad Sharciga Tababarada, Xirfadaha, Carruurta iyo Waxbarashada 2009 (sida lagu saxay): Akadeemiyada 16-19, xarumaha Gaarka ah ee 16 ka dambeeya iyo Bixiyeyaasha Tababarka Madaxa banaan
- **mulkiilayaasha dugsiyada madaxa banaan** (oo ay ku jiraan akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo xarumaha kale ee wax bixinta) iyo dugsiyada gaarka ah ee aan dowlada ahayn. Marka laga eego xagga akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo akadeemiyadda kale ee wax bixinta, mulkiiluhu wuxuu noqon doonaa kalsoonida akadeemiyadda
- **guddiyada maamulka ee cutubyada gudbinta ardayda (PRUs), iyo**
- **kooxaha hoggaanka sare**

Inta lagu jiro tusmada, tixraaca '**guddiga maamulka iyo mulkiilayaasha**' oo ay ku jiraan guddiyada maamulka in lasoo sheego maahee.

## Shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada

Waa muhiim in **qof kasta** oo ka shaqaynaaya dugsi ama kuleej uu fahmo waajibaadka ka saaran ilaalinta carruurta. Hay'adaha maamulka iyo mulkiilayaasha waa inay xaqiijiyaan in shaqaalaha sida tooska ah ula shaqeeya carruurta ay akhriyaan **ugu yaraan** qaybta kowaad ee tusmadaan.

Guddiga maamulka iyo mulkiilayaasha, la shaqaynaya kooxahooda hoggaanka sare iyo gaar ahaan hoggaanka ilaalinta loo magacaabay, waa inay xaqiijiyaan in shaqaalaha aan sida tooska ah ula shaqeyn carruurta ay akhriyaan farqaddda koowaad ama Lifaaqa A (nooca la isku koobay ee Qaybta koowaad) ee tusmadaan. Tani gabi ahaanteed waa arrin u taalla dugsiga ama kuliyada waxaana lagu salayn doonaa qiimayntooda ku aaddan tusmada waxtarka ugu badan u leh shaqaalahooda si ay u ilaaliyaan una hormariyaan faya dhawrka carruurta.

Guddiga maamulka iyo mulkiilayaasha waa iney hubiyaan iney meel mariyaan geedi-socoday ku caawiyaan shaqaalaha si ay u fahmaan oo ay u gutaan doorarkooda iyo mas'uuliyadaha sida ku qeexan Farqadda koowaad (ama Lifaaqa A haddii ay habboon tahay) ee tusmadaan.

## Waxa tusmadaan ay beddelayso

tusmadaan waxay bedelaysaa Badbaadinta carruurta waxbaranaysa 2023. Jadwal isbaddello muhiim ah ayaa kamid ah Lifaaqa F

# Qaybta koowaad: U ilaalinta macluumaadka dhammaan shaqaalaha

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay ogaadaan islamarkaana sameeyaan

### Habka ilaalinta iyo qorshe udub dhexaad u ah ilmaha

1. Dugsiyada iyo kuliyadaha iyo shaqaalahooda waxay qayb muhiim ah kayihiin hanaanka balaaran ee nidaamka ilaalinta caruurta. Nidaamkan waxaa lagu sifeeyay tusmada sharciga ah ee wada shaqaynta ilaalinta Carruurta.

2. Ilaalinta iyo hormarinta badqabka carruurta ayaa ah masuuliyad qof kasta saaran. 'Carruur' waxaa kamid ah qof kasta oo ka yar da'da 18. Qofkasta oo lajooga caruurta iyo qoysaskooda wuxuu leeyahay door uu ciyaaro. Si loo buuxiyo mas'uuliyadan si wax ku ool ah, dhamaan dhakhaatiirta waa inay xaqiijiyaan waajahooda udub dhexaadka ilmaha. Tani waxay kadhigan tahay inay kafakaraan, mar kasta, waxa ay tahay maslaxadda ugu fiican ee ilmaha.

3. Majiro dhakhtar kali ah oo haysan kara sawirka baahiyaha buuxa ee ilmaha iyo duruufaha uu kujiro. Hadii caruurta iyo qoysasku helayaan caawimaada saxda ah xilliga saxda ah, qof kasta oo lakulma iyaga wuxuu door kuleeyahay aqoonsiga walaacyada ay qabaan, uu la wadaago macluumaad uuna qaado tallaabo degdeg ah. Ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka caruurta waxaa lagu qeexaa marka aga fiirsho ujeedooyinka tusmadaan:

- Bixinta caawimaad iyo taageero si loo daboolo baahiyaha carruurta isla marka ay dhibaatooyinku soo shaac baxaan
- ka ilaalinta carruurta in si xun loola dhaqmo, hadday tahay guriga gudihiisa iyo dibaddiisa, oo ay ku jirto onlaynka
- ka hortagga laxaad la'aanta caruurta ee dhimirka iyo caafimaadka ama korrniinka jirka
- hubinta in carruurtu ku koraan xaalado waafaqsan bixinta daryeel badbaado leh oo waxtar leh
- qaadida tallaabo lagu suurtagalinayo dhammaan carruurta inay helaan natiijooyinka ugu wanaagsan

### Doorka shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda

4. Shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda si gaar ah ayey muhiim uyihiin maadaama ay leeyihiin awood ay ku aqoonsadaan walaaca ilmaha xili hore, iney kor u qaadaan faya dhawrka carruurta iyo inay siin karaan caawimaad, ayna kahortagi karan in walaaca ay carruurtu qabaan kasii daro.

5. Dhammaan shaqaalaha waxaa saaran mas'uuliyad ah inay siiyaan caruurta goob ammaan ah oo ay wax kubartaan.

6. Dhammaan shaqaaluha waa inay u diyaar garoobaan inay aqoonsadaan carruurta laga yaabo inay ka faa'iidaystaan caawinta hore.[4] Caawinta hore waxay la macno tahay in la bixiyo taageero isla marka ay dhibaato soo baxdo meel kasta oo ka mid ah nolosha ilmaha, laga bilaabo aasaaska sannadaha ilaa sannadaha dhallinta.

7. Xubin kasta oo shaqaale ah oo wax welwel ah ka qabta daryeelka ilmaha waa inuu raacdaa hannaanka lagu sheegay cutubyada 49-55. Shaqaaluha waa inuu diyaar u ahaadaan kataageerista shaqaalaha arrimaha bulshada iyo wakaaladaha kale iyagoo raacaaya gudbin kasta.

8. Dugsi kasta iyo kuleej kastaa waa inay lahaadaan hoggaan ilaalineed oo loo qoondeeyey kaasoo siin doona taageerada shaqaalaha si ay u gutaan waajibaadkooda ilaalinta oo si dhow ula xidhiidhi doona adeegyada kale sida daryeelka bulshada ee dawladda hoose.

9. Hogaanka badbaadinta ee shaqada loo magacaabay (iyo cid kasta oo ku xigeenno u ah) waxay ubadanyihiin iney haystaan sawirka dhamaystiran ee ilaalinta ilmaha uuna noqdo hoggaanku qofka ugu habboon ee katalo bixinaaya jawaabta laga bixinaayo walaacyada dhanka ilaalinta.

10. Heerarka Macallimiinta 2012 ayaa sheegaya in macallimiinta (oo ay ku jiraan maamulayaasha) waa inay ilaaliyaan wanaagga carruurta oo ay ilaaliyaan kalsoonida dadwaynaha ee xirfadda macallinimada taas oo qayb ka ah waajibaadkooda xirfadeed.[5]

## Waxa shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada ay u baahan yihiin inay ogaadaan

11. Dhammaan shaqaaluha waa inay ka warqabaan nidaamyada dugsigooda ama kulliyadda taageeraya ilaalinta, kuwaasna waa in lagu sharraxaa qayb ka mid ah soo-gelinta shaqaalaha. Tani waa inay ku jiraan:

- siyaasada ilaalinta ilmaha (iyo waxyaabo kale oo la socda oo sidoo kale ay ku jiraan siyaasada iyo nidaamyada lagaga jawaabayo tacaddiga ilmo-ilmo kale kula kaco)
- siyaasadda dhaqanka (taas oo ay ku jiraan tallaabooyinka looga hortagayo cagajuglaynta, oo ay ku jiraan cagajuglaynta intarnet-ka, cagajuglaynta ku salaysan eexda iyo takoorka).[6]
- siyaasada habdhaqanka caruurta (mararka qaar loo yaqaan xeerka anshaxa) iyo waxyaabo kale, oo ay ku jiraan walaacyo yar, eedeymaha shaqaalaha iyo khashifida
- ilaalinta jawaabta carruurta ka maqan waxbarashada, gaar ahaan waqtiyada soo noqnoqda iyo/ama muddada dheer

[4] Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan caawimada hore waxa laga heli karaa Working Together to Safeguard Children. (Ka wada shaqaynta Ilaalinta Carruurta.)
[5] **Khalad Lifaaqa tixraaca ma shaqaynayo.**
[6] Dhammaan dugsiyada waxa looga baahan yahay inay yeeshaan siyaasad habdhaqan (faahfaahinta oo dhami waxaad la helaysaa here (halkan)). Hadii kulliyaddu uu ubaahato iney dagsato xeerka habdhaqanka waa in loosheegaa shaqaalaha sida kor ku qeexan.

- doorka hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay (oo ay ku jirto aqoonsiga hoggaanka ilaalinta iyo ku xigeennada kasta)

Nuqulada siyaasada iyo nuqulka Farqadda koowaad (ama Lifaaqa A, hadii ay ku munaasab tahay) ee waraaqahan waa in loo ansixiyaa **dhammaan** shaqaalaha loo idmaday.

12. Dhammaan shaqaaluha waa inay helaan tababar ku habboon ilaalinta iyo ilaalinta carruurta (oo ay ku jirto badbaadada intarnet-ka oo ay ka mid yihiin waxyaabo kale, oo ay ku jiraan fahamka waxyaabaha laga filayo, doorarka iyo mas'uuliyadaha habboon ee la xiriira kala soocidda iyo la socodka – eeg para 140 wixii macluumaad dheeraad ah) marka la soo galiyo. Tababarka waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa. Intaa waxaa dheer, dhammaan shaqaaluha waa inay helaan ilaalinta iyo ilaalinta ilmaha (oo ay ku jirto badbaadada intarnet-ka) cusboonaysiinta (tusaale, iimaylka, jaraa'idka elagtarooniga ah, iyo shirarka shaqaalaha), kolba sidii loogu baahdo, iyo ugu yaraan sannad kasta, si loo sii wado bixinta xirfadaha la xiriira iyo aqoonta si-si waxtar le loo ilaaliyo carruurta.

13. Dhammaan shaqaaluha waa inay ogaadaan habka caawinta hore ee deegaankooda islamarkaana fahmaan doorkooda ay ku leeyihiin.

14. Dhammaan shaqaaluha waa inay ka warqabaan hannaanka loo gudbinayo daryeelka bulshada carruurta ee dawladda hoose iyo qiimaynta qaanuuniga ah.[7] sida uu dhigayo Xeerka Carruurta 1989, gaar ahaan farqadda 17 (carruurta u baahan) iyo qaybta 47 (ilmo silicsan, ama ay u badan tahay inay silicasanto. waxyeelo weyn) oo laga yaabo inay raacdo tixraac, oo ay la socoto doorka laga filayo inay ka ciyaaraan qiimaynahaas.

15. Dhammaan shaqaaluha waa inay ogaadaan waxa la samaynayo haddii ilmuhu u sheego in lagu xadgudbay, la isticmaalay, ama la dayacay. Shaqaaluha waa inay garanayaan sida ay u maaraynayaan heerka ilaalinta asturaad habboon. Tani macneheedu waa in dadka ku lug leh ee u baahan inay ku lug yeeshaan, sida hoggaanka ilaalinta loo magacaabay (ama ku xigeenkiisa) iyo daryeelka bulshada carruurta ee maamulka deegaanka. Shaqaalaha waa ineysan marna ilmaha u ballan qaadin ineysan cidna usheegi doonin warbixintiisa nooc kasta oo tacaddi ah, maadaama aysan arintaani ugu dambeyn noqon doonin maslaxada ugu haboon ee ilmaha.

16. Dhammaan shaqaaluhu waa inay awoodaan u xaqiijinta dhibanayaasha in cabashadooda si adag oo baaraayo lana siin doono taageero iyo badqab. Dhibbanaha waa inaan waligiis la siin aragtida ah inay abuurayaan dhibaato iyagoo ka warbixinaya nooc kasta oo tacaddi iyo/ama dayacaad ah. Oo yeysan noqon in dhibane marna la dareensiiyo inuu dareemo ceeb markuu soo sheego tacaddika.

17. Dhammaan shaqaalaha waa inay ogaadaan in carruurtu aanay diyaar u noqon karin ama aanay garanayn sida qof loogu sheego in lagu xadgudbay, la isticmaalay, ama la dayacay, iyo/ama laga yaabo inaanay u aqoonsan waayo aragnimadooda inay

[7] Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan qiimaynta sharciga waxaa laga heli karaa [Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Ilaalinta Carruurta)]

yihiin waxyeello. Tusaale, carruurta waxay dareemi karaan xishood, bahdilaad, ama in loo hanjabay. Tani waxay ka iman kartaa iney nugulyihiin, laxaad la'aan iyo/ama aqoonsiga galmada ama caqabad luqad. Tani waa inaysan ka hor istaagin shaqaalaha iney yeeshaan xirfad loo dhararo oo ay la hadlaan hogaanka ilaalinta loo qoondeeyay haddii ay walaac ka qabaan ilmo. Waxa kale oo muhiim ah in shaqaalaha go'aamiyaan sida ugu wanaagsan ee loo dhisi karo cilaaqaad la isku halleyn karo oo fududeeya xiriirka carruurta iyo dhallinyarada.

## Waxa shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay tahay iney u kuurgalaan

### Caawinta hore

18. Ilmo kasta ayaa suurtagal ah inuu ka faa'iidaysto caawinta hore, balse dhammaan shaqaalaha dugsiga iyo kulliyadda waa inay si gaar ah uga digtoonaadaan baahida suurtagalka ah ee caawinta hore ee ilmaha:

- laxaadka la' ama qaba xanuunnada qaar islamarkaana qaba baahiyo dheeraad ah oo gaar ah
- qaba baahiyo waxbarasho oo gaar ah (ha haystaan ama yey haysan qorshe waxbarasho, caafimaad iyo daryeel sharci ah)
- qaba baahi caafimaad oo dhimirka ah
- ah daryeele dhalinyaro ah
- muujinaya calaamado u horseedayay ka dhex bixidda dadka ama habdhaqan danbiile, oo ay kamid tahay ku lug yeelasho burcad iyo la shaqaynta danbiyada lasoo abaabulay ama khadka ismaamulka
- si soo noqonoqta uu ka maqanyahay waxbarashada, guriga ama daryeelka,
- uu la kulmay cayrin badan, halis ugu jiro in si joogto ah looga saaro dugsiyada, kulliyadaha iyo qayb kaduwan ama Qaybta Waaxda Gudbinta Ardayda.
- uu halis ugu jiro addoonsiga casriga ah, ka ganacsiga, galmada iyo/ama u isticmaalidda dembiyada
- uu khatar ugu jiro in uu noqdo xagjir ama la isticmaalo
- uu leeyahay waalid ama daryeele xabsiga ku jira, ama ay saamayso tacaddika waalidnimo
- ay xaalada qoysku ku keentay caqabad ilmaha, sida balawadaha mukhaadaraadka iyo khamrida, mushkilada caafimaadka dhimirka dadka waawayn iyo tacaddi guriga dhexdiisa ah
- leh laftiisu balwado khamri iyo mukhaadaraad kale
- halis ugu jirtaa waxa loogu yeero 'sharaf' ku salaysan tacaddi sida gudniinka fircooniga ah ama Guurka Khasabka
- uu yahay ilmo si gaar ah qof uu u korsaday.

## Tacaddi, dayac iyo isticmaal

19. Dhammaan shaqaaluhu waa inay ka digtoonaadaan tilmaamayaasha tacaddi, dayaca iyo dhiig-miirashada (hoos eeg), fahamka in carruurtu ay halis ugu jiraan waxyeello gudaha iyo dibadda dugsiga/kulliyadda, gudaha iyo dibadda guriga, iyo onlayn. In la yeesho dharar xirfadle oo la ogaado waxa ay tahay in la eego taas oo muhiim u ah ishaarooyinka hore ee tacadiga iyo dayacaada si markaa shaqaaluhu ay u ogaan karaan kiisaska caruurta ee u baahan kaalmo ama ilaalin.

20. Dhammaan shaqaalaha dugsiga iyo kulliyaduhu waa inay ogaadaan in tacaddiga, dayaca, isticmaalka, iyo arrimaha ilaalinta ay yihiin dhacdooyin dhif ah oo aan lagu dabooli karin hal qeexitaan ama hal calaamad oo keliya. Inta badan, arrimo badan ayaa is-dul-saarnaan doona.

21. Dhammaan shaqaalaha, balse gaar ahaan hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay (iyo ku xigeennada) waa inay tixgeliyaan haddii carruurtu halis ugu jirto tacaddi ama isticmaalid xaaladaha ka baxsan qoysaskooda. Dhibaatooyinka qoyska ee dheeraadka ah waxay qaataan noocyo kala duwan oo carruurtu waxay u nugulaan karaan waxyeellooyin badan oo ay ku jiraan (balse aan ku xaddidnayn) tacaddi galmo (oo ay ku jiraan dhibaatayn iyo isticmaalid), tacaddiga qoyska ee xiriirkooda hooseeyo (tacaddiga xiriirka dhalinyarada), isticmaalida, dembiilaha. rabshadaha dhalinyarada, khadadka gobolka iyo xagjiraynta.

22. Dhammaan shaqaalaha waa inay ogaadaan in teknoolajiyadda ay qayb muhiim ah ka tahay dhawrista iyo arrimaha fayoqabka. Caruurtu waxay khatar ugu jirtaa tacadiga iyo khataraha kale ee onlaynka ah iyo sidoo kale fool-ka-fool. Marar badan tacaddiga iyo khatarta kale waxay u dhacaan u soo noqnoqta onlayn iyo kuwa aan onlaynka ahayn labadaba. Carruurtu iyaga ayaa sidoo kale onlaynka iyagaa tacaddi isku geysta, tani waxay u dhacdaa fariimo tacaddi, hanjabaad iyo dhaqan xumo/nacayb ah, in iyada oo aan la ogolayn qofka lala wadaago sawiro aan wanaagsanayn, gaar ahaan kooxaha wada sheekeysiga, iyo in lala wadaago sawiro iyo muuqaalo qaaqaawan, kuwa aan doonaynin inay helaan waxyaabaha noocaas ah.

23. **Dhammaan kiisaska, hadii ay shaqaaluhu ka shakiyaan, waa inay kala hadlaan hoggaanka ilaalinta loo doortay ama ku xigeenkooda.**

## Astaamaha muujinaya tacaddiga iyo dayacaada

24. **Tacaddi**: waa nooc kamid ah si xun ula dhaqanka ilmaha. Qof ayaa tacaddi u gaysan kara ilmo ama dayici kara isagoo u sababaya khatar ilmaha kudhacda ama kufashilmaaya tallaabadii uu uga hortagi lahaa khatarta. Waxyeellada waxaa kamid noqon karta si xun ula dhaqan aan jir ahaan iyo sidoo kale saamaynta araga si xun ula dhaqanka dadka kale. Tani waxay si gaar ah u khusayn kartaa, tusaale ahaan, marka la eego saamaynta ay ku leedahay carruurta nooc kasta oo tacaddi guriga ah, oo ay ku jirto halka ay ku arkaan, maqlaan ama la kulmaan saamaynteeda. Carruurta waxaa tacaddi loogu gaysan karaa gudaha qoyska ama xarun waxbarasho ama xarun bulsho waxaana ku tacaddin kara dadka ilmuhu yaqaanaan ama, marar dhif ah, dad kale. Tacaddiga wuxuu ka si buuxda uga dhici karaa onlaynka, ama teknoolajiyadda ayaa suurtagal ah in

loo isticmaalo fududaynta tacaddiga aan onlaynka ahyan. Caruurta waxaa ku xadgudbi kara qof qaangaar ah ama dad qaangaar ah ama ilmo kale ama caruur kale.

25. **Xad gudubka jirka ah**: waa nooc kamid ah xad gudubka kaasoo ay kujiri karaan nabar kudhufasho, hantaaturayn, tuuris, sumayn, gubid ama wax kulul uridis, biyo kuquusin, naqas kudhajin ama hadii kale dhibaato loo gaysto jirka ilmaha. Dhibaataynta jirka ayaa sidoo kale imaan karta marka waalid ama qof daryeele ah uu buunbuuniyo, ama si kas ah ugu rido, xanun ilmaha.

26. **Xad gudubka dareenka**: niyad kadilka ilmaha ee joogtada ah sida in lagu abuuro saamayno daran oo xun kobaca dareen ee ilmaha. Waxaa kujiri kara in ilmaha loogu celceliyo inuu yahay mid nacas ah ama aan cidna jeclayn, aan wax kutoornayn, ama kaliya ay qiimo uleeyihiin sabab laxariirta inay baahida qofkale buuxshaan. Waxaa kamid ahaan kara inaan ilmaha lasiin fursado uu ku sheego waxa uu dareemaayo, in si gardarro ah loogu xiro hadalka ama 'lagu shactiraysto' waxa uu sheego ama sida uu u hadlo. Waxaa kujiri kara in himilooyin aan kuhaboonayn da'da ama heerka kobaca ee ilmaha kuwaasoo sandulle looga dhigo caruurta. Kuwaan waxaa kamid noqon kara isdhexgal uusan ilmuhu gaarin marka laga fiirsho awoodiisa kobac iyo sidoo kale difaac xaddhaaf ah iyo in laxakameeyo waxyaabaha ay daawan karaan iyo waxbarashadooda, ama in ilmaha laga hor istaago kaqaybgalka isdhexgalada caadiga ah ee bulshada. Waxay ku lug yeelan kartaa in la arko ama la maqlo si xun ula dhaqanka qof kale. Waxay noqon kartaa cagajugleyn daran (oo ay kamid tahay hanjabaada internet-ka) taasoo keenaysa in caruurtu si joogto ah udareemaan cabsi ama inay halis kujiraan, ama in lasasabto ama musuq carruur. Qaar kamid ah heerka tacaddiga shucaareed ayaa laxariira dhammaan noocyada si xun ula dhaqanka carruurta, inkastoo ay kaligeed dhici karto.

27. **Tacaddi galmo**: waxay ku lug leedahay ku khasbida ama ku qalqaalinta ilmo ama qof dhallin yaro ah inay ka qayb qaataan ficillo galmo, oo aanay ku jirin gacan qaad, haddii ilmuhu ka warqabo waxa dhacaya iyo in kale. Ficilladan waxaa kujiri kara taabasho jireed, oo ay kamid tahay weerar laxiriira in ilmaha loo galmoodo (tusaale kufsi ama galmada afka) ama falalka aan ahayn galmada sida siigaysiga, dhunkashada, istiiminta iyo taabasha jir salaaxa ah dhar la'aan. Waxaa sidoo kale kamid noqon kara ficillada aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo fiirsashada, ama soosaarista, sawirro galmo ah, daawashada muuqaalada galmada, ku dhiirrigalinta carruurta inay u dhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama u diyaarinta ilmaha si aad tacaddi ugu samayso. Tacaddiga galamada ayaa ka dhici kara khadka onlaynka, farsamada casriga ah ayaana loo adeegsan karaa fududaynta tacaddi aan onlayn ahayn. Tacaddiga galmada maaha mid ay kaliya sameeyaan rag qaangaarka ah. Haweenka ayaa sidoo kale gali kara tacaddi galmo, si lamid ah sida ay ugu samayn karaan carruurta kale. Tacaddiga galmada carruurta ku samayso carruurta kale waa arrin ilaalin gaar ah oo xagga waxbarashada ah dhammaan shaqaaluhuna waa inay ka warqabaan dugsigooda ama kulliyaddooda siyaasadda iyo hababka wax looga qabanayo.

28. **Dayaca**: waa fashilka joogtada ah ee ku aadan buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee jireed iyo/ama maskaxeed ee caruurta, taasoo ay ubadan tahay inay abuurto naafo ba'an oo gaarta caafimaadka ama kobaca ilmaha. Dayaca ayaa dhici kara intay hooyadu uurka leedahay, tusaale, sabab laxariirta in hooyadu cabbi jirtay waxyaabaha maandooriyaha ah. Mar haddii ilmo dhasho, dayacaaddu waxay ku lug yeelan kartaa waalidka ama daryeelaha oo ku guul daraysta: bixinta cunto, dhar iyo hoy ku filan (oo ay ku jirto ka saarida guriga ama ka tagis); ka ilaali ilmaha waxyeellada jireed iyo dareenka ama

khatarta ah; xaqiiji kormeer ku filan (oo ay ku jiraan isticmaalka daryeelayaasha aan ku filnayn); ama hubi helitaanka daryeel caafimaad ama daaweyn habboon. Waxaa sidoo kale ka mid noqon kara dayacaadda, ama inaan qofku kajawaabi karin, baahiyaha aasaasiga ah ee shucuurta ilmaha.

## Arrimaha ilaalinta

29. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney ka warqabaan arrimaha ilaalinta kuwaasoo ilmaha galin kara halis ah in dhibaato gaarto. Habdhaqanka ku xiran arrimaha ay ka midka yihiin qaadashada maandooriyaha iyo/ama si xun u isticmaalka khamriga, maqnaanshaha aan la macnayn karin iyo/ama ka maqnaanshaha joogtada ah ee waxbarashada, rabshado ba'an (oo ay ku jiraan kuwa ku xiran khadadka degmada), xagjirnimada iyo is afgaradka iyo wadaagga aan raalliga ka ahayn ee sawiro qaawan iyo kuwo qayb ka qaawan iyo/ama muuqaallada.[8] waxay noqon karaan calaamado muujinaya in carruurtu halis ku jiraan. Hoos waxaa ku jira qaar kamid ah mushkilada ilaalinta ee dhamaan shaqaalaha ay tahay iney ogaadaan.

**Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan arrimahan ilaalinta iyo macluumaadka kusaabsan arrimaha kale ee ilaalinta ayaa lagu daray Lifaaqa B.**

### Tacaddiga ilmaha kula kaco ilma kale

30. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney la socdaan in caruurta ay tacadi kula kacda carruurta kale (taasoo badanaa loo yaqaan tacadiga ilmaha kula kaco ilma kale), oo ay ka dhici karto gudaha iyo bannaanka dugsiga ama kulyadda iyo onlaynka. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay caddeeyaan nidaamka iyo dugsiga ama kulliyadda ee la xiriira tacaddiga carruurta iyo doorka muhiimka ah ee ay ku leeyihiin ka hortagga iyo ka falcelinta halka ay rumaysan yihiin in ilmuhu khatar uga iman karto.

31. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay fahmaan in xitaa haddii aan warbixinno oollin dugsiyadooda ama kulliyadahooda aysan macnaheedu ahayn inaysan dhacayn. Waxaa laga yaabaa inay dhacdo inaan tacaddi la soo sheegin. Sidan oo kale waxaa muhiim ah in marka shaqaaluhu ay qabaan wax walaac ah oo ku saabsan tacaddiga ubadka ka dhashay waa inay la hadlaan hogaankooda ilaalinaya (ama ku xigeenka).

32. Waa lagama maarmaan in **dhammaan** shaqaaluhu fahmaan muhiimadda ay leedahay in laga hortago dhaqamada aan habboonayn ee u dhexeeya carruurta habdhaqanka tacaddiga ah. Tusaalooyinka kuwaas ayaa hoos ku taxan. Hoos u dhigista habdhaqannada qaarkood, tusaale ahaan in waxba aan laga soo qaadin dhibaataynta galmoodka sida “kaliya in lagu qoslo”, “qayb ka mid ah korriinka” ama “innamada oo ah wiilal” waxay u horseedi kartaa caado habdhaqan aan la aqbali karin, ammaan darro. Bey'ada carruurta iyo xaaladaha ugu daran ee dhaqan caadi ka dhigaya tacaddiga taasoo ay keentay in carruurtu u aqbalaan si caadi ah oo aan u soo bixin si ay u sheegaan.

[8] Heshiis sawir wadaag, gaar ahaan inta u dhaxaysa carruurta waaweyn ee isku da'da ah, waxay u baahan kartaa jawaab ka duwan. Waxaa suurtagal ah inaysan ahayn tacaddi – balse carruurtu waa iney wali ogaadaan iney tahay sharci darro- halka wadaagista aan qofka kale ogolaan ay tahay sharci darro iyo tacaddi. UKCIS waxay bixisaa talo faahfaahsan oo ku saabsan wadaagga sawirada iyo muuqaallada qayb ahaan qaawan ama wada qaawan.

33. Tacaddiga ilmaha kula kaco ilama kale waxay u badantahay iney kamid noqdaan, balse kuma koobna:

- gardaraysiga (ay kamid tahay gardaraysiga internet-ka dhaxdeeda, wax cuqdad ku saleysan iyo gardaraysiga takoorka)
- tacadiga xiriirka jacayl ee shakhsiyadeed ee u dhexeeya caruurta (mararka qaar loo yaqaan 'tacadiga xiriirka dhawr iyo toban jirada')
- tacaddiga jirka sida wax ku kudhufasho, laadid, gilgilid, garaac, timo jiidid, ama waxyeelo kale oo jir (waxaa kamid noqon kara shayo onlayn ah oo fududayn kara, waxyeeli kara iyo/ama horseedi kara tacadi jir)
- galmada gacan qaadka[9] sida kufsiga, weerarka galmada iyo faraxumaynta; (tani waxa ku jiri kara onlaynka kaasoo fududeeya, hanjabaada iyo/ama dhiirigeliya galmada gacan qaadka)
- dhibaataynta galmada[10] sida faallooyinka galmada, odhaahyada, kaftanka iyo dhibaataynta intarnet-ka ee onlaynka ah, taasoo noqon karta mid gooni ah ama qayb ka mid ah qaabka ballaaran ee tacaddiga
- oo sababa qof inuu sameeyo ficillo galmo isagoo aan raalli ka aheyn, sida in qof lagu khasbo inuu dharka iska saaro, u taabasho qaab galmo qof, ama in uu cid kale la sameeyo galmo
- wadaaga is-afgarad iyo is-afgarad-la'aan ah oo qaawan iyo muuqaal qaawan iyo/ama muuqaalo[11] (sidoo kale loo yaqaan sexting ama dhalinyarada soo saartay sawir galmo)
- sawirka ka qaadida googarada hoosteeda[12] kaasoo sida caadiga ah ku lug leh in sawir laga qaado dharka qofka hoostiisa ogolaansho la'aan, iyadoo ujeedadu tahay in ay daawato xubintooda taranka ama dabada si ay u helaan raaligelin galmo, ama u keenta dhibbanaha bahdil, cidhiidhi, ama qeylo dhaan, iyo
- Abuurista/bilaabida nooc rabshad ama saansaanteeda (tan waxaa kamid noqon kara falalka la xariira dhibaataynta, tacaddika ama bahdilaada loo adeegsado qaab qfka loogusoo daro koox waxaana sidoo kale ku jiri kara waxyaabaha oonlaynka ah).

---

[9] Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan galmada gacan qaadka eeg Qaybta 5 iyo Lifaaqa B.
[10] Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dhibaataynta galmada eeg Qaybta 5 iyo Lifaaqa B.
[11] Tusmada UKCIS: Sharing nudes and semi-nudes advice for education settings (Wadaagista qaawanaanta iyo qaawanaanta qaybta ah ee goobaha waxbarashada)
[12] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan 'upskirting' eeg Lifaaqa B.

## U isticmaalida carruurta dambiyo (CCE) iyo isticmaalida carruurta (CSE)

34. Labadaba CCE iyo CSE waa noocyo tacaddi ah oo ka dhaca marka qof ama koox ay isticmaalaan dheelitir la'aanta awoodda si ay u khasbaan, u koontoroolaan ama u khiyaameeyaan ilmaha si uu uga qayb qaato fal dambiyeed ama galmo. Waxay ku lug yeelan kartaa beddelka shay dhibbanuhu u baahan yahay ama doonayo, iyo/ama faa'iido dhaqaale ama heerka korodhka ah ee dembiilaha ama fududeeyaha iyo/ama iyada oo loo marayo rabshad ama hanjabaad rabshado. CCE iyo CSE ayaa saamayn kara carruurta, lab iyo dhaddig ba waxaana ku jiri kara carruurta lasoo dhoofiyay (oo caadiyan loogu yeero dad dhoofin) si looga faa'iidayso.

## U isticmaalida carruurta dambiyo (CCE)[13]

35. Qaar kamid ah qaababka gaarka ah ee CCE waxaa ku jiri kara carruurta in lgu qasbo ama lagu khaldo qaadista daroogooyink ama lacagta ayadoo la adeegsanaayo laymanka degmada, in laga shaqaalaysiiyo warshadaha daroogada, dukaan qaadista ama jeeb siibka. Waxaa sidoo kale lagu qasbi karaa ama lagu qaadi karaa iney galaan fal danbiyeedka gaariyaasha ama ku hanjabida/samaynta rabshad xun oo ka dhan ah dadka kale.

36. Caruurta ayaa ku dhax xannibmi karta noocyadan ka faa'idaysiga, maadaama oo dambiiluhu uu ugu hanjabi karo dhibanaha (iyo qoysaskooda) iney waxyeeli doonaan ama iney ku xanibaan oo ay ku qasbaan deyn lagu leeyahay. Waxaa lagu qasbi karaa inay qaadaan hub sida mindiyo ma iney bilaabaan qaadashada mindi si ay u siiso dareen difaac ay ka helaan wayeelo kasoo gaarta dadka kale. Iyadoo carruurta qaybta ka ah u isticmaalida fal dambiyeedyada ay badanaa galaan danbiyo, nugulkooda ka dhibanayaal ahaan maaha wax markasta ay ka aqoonsadaan dadka waawayn iyo xirfadlayaashu, (gaar ahaana carruurta roon-roon), islamarkaana aan loola dhaqmin iney yihiin dhibanayaal inkastoo ay waxyeelo ku dhacayso. Wali waxaa looga faa'iidaysan karaa fal dambiyeedyada xataa haddii falku u muuqdo wax ilmuhu aqbaleyn ama ay rabaan.

37. Waa muhiim in la ogaado in khibrada ay maraan gabdhaha falalka dambiga loo adeegsaday ay aad uga duwanaan karto wiilasha. Tilmaamahaas ayaa kala duwanaan kara, hase yeeshee xirfadlayaashu waa iney ogaadaan in gabdhaha loo adeegsan karo falalka dambiga sidoo kale. Sidoo kale waa muhiim iney ogaadaan in labadaba wiilasha iyo gabdhaha loo adeegsaday fal dambiyeedka ay khatar dheeraad ah ugu jiraan in looga faa'iidaysto falalka galmada.

## U isticmaalida carruurta galmo (CSE)

38. CSE waa qaab kamid ah tacaddiga galmada ilmaha. Tacaddiga galmo waxa uu ku lug yeelan karaa taabashada jirka, oo ay ku jirto weerarka galmo (tusaale, kufsi ama galmo afka ah) ama falal aan galmo lahayn sida siigeysiga, dhunkashada, isku xoqida, iyo taabashada dibadda dharka. Waxaa sidoo kale kujira falalka aan taabashada

[13] Ka eeg macluumaadka qeexida CCE bogga 48 ee Home Office's Serious Violence Strateg (Xeeladda Xadgudubka Daran ee Xafiiska Arrimaha Gudah)y (a)

lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo isamaynta sawirada galmada, ku khasbida ilmaha inay fiirshaan sawirada galmada ama ay daawadaan muuqaallada galmada, kudhiirri galinta caruurta iney udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si ay tacaddi ugu sameeyaan ayna ku jirto kan dhanka internet-ka.

39. CSE waxa uu dhici karaa mudo ama hal mar oo waxa uu dhici karaa iyada oo aanu ilmuhu ogeyn tusaale ahaan in muuqaal ama sawiro lagula wadaago baraha bulshada.

40. CSE waxay saamayn kartaa ilmo kasta oo lagu qasbay iney sameeyaan hawlo galmo. Waxaa kamid ah 16- iyo 17- sano jir waxa uu si sharci ah u ogolaan karaan galmada. Carruurta qaarkood ma dareemaan in laga faa'iidaysanayo waxaana laga yaabaa iney rumaystaan iney xiriir jacayl oo dhab ah ka dhexeeyo.

### Tacaddiga guryaha

41. Tacaddiga guriga waxa uu keeni karaa habdhaqano kala duwan oo waxa uu noqon karaa dhacdo kaliya ama dhacdooyin joogto ah. Tacaddigu waxa uu noqon karaa, balse aan ku xadidnayn, maskax ahaan, jir, galmo, dhaqaale ama shucuur. Caruurta ayaa u noqon kara dhibane tacaddiga guriga. Waxay arki, maqli ama dareemi karaan saamaynta tacaddiga guriga oo/ama waxay la kulmi karaan tacaddiga guryaha ee xiriirka jacayl (tacaddiga xiriirka dhawr iyo toban jirrada). Dhammaan kuwaas oo ku yeelan kara saamayn mudo dheer ah caafimaadkooda, badqabkooda, korniinkooda, iyo awoodooda waxbarasho.

### Gudniinka fircooniga (FGM)

42. Iyadoo **dhammaan** shaqaalaha ay tahay inay la hadlaan hoggaanka ilaalinta ee loo qoondeeyay (ama ku xigeenka) ee ku saabsan wixii walaac ah ee ku saabsan gudniinka fircooniga ah (FGM), waxaa jira waajibaad sharci oo **gaar ah oo saaran macallimiinta.**[14] Haddii macalinku, isagoo ku guda jira shaqadiisa xirfadda ah, uu ogaado in fal gudniinka fircooniga ah uu u muuqdo in lagu sameeyay gabar kayar da'da 18, macalinku waa inuu ku wargeliyaa booliska. Eeg bogga 160 wixii macluumaad dheeraad ah.

### Caafimaadka Dhimirka

43. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay ka warqabaan in dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka ay, mararka qaar, noqon karaan tilmaan muujinaysa in ilmo uu la ildaran yahay ama khatar ugu jiro inuu la ildarnaado tacaddi, dayacaad ama ka faa'iidaysi lagu sameeyay.

[14] Marka loo eego farqadda 5B(11) (a) ee Xeerka Gudniinka Fircooniga ah ee 2003, “macallin” waxaa loola jeedaa, iyadoo lala xiriirinayo England, qof ku jira farqadda 141A(1) ee sharciga waxbarashada 2002 dugsiyada iyo machadyada kale ee England).

44. Kaliya shaqaalaha sida saxda ah loo tababaray ayey tahay iney isku dayaan baarida cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah. Haseyeeshee, shaqaalaha waxbarashada, waxay fursad fiican u haystaan inay la socdaan carruurta maalin kasta ayna aqoonsadaan ilmaha dabeecadiisu muujinayso inuu waajahaayo cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah ama khatar ugu jiro inuu cilad waajaho. Dugsiyada iyo kulyadaha ayaa heli kara talooyin badan oo ka caawinaaya aqoonsiga carruurta u baahan taageerada dheeraadka ah ee caafimaadka dhimirka, tan waxaa kamid ah la shaqaynta wakaalado dugsiga ka baxsan.

45. Haddii shaqaalaha ay qabaan walaac caafimaadka dhimirka ah oo ku saabsan ilmaha kaas oo sidoo kale ah walaac ilaalin, waa in tallaabo degdeg ah laga qaadaa si loo raaco siyaasadda ilaalinta carruurta ee dugsigooda ama kulliyadda iyo iyadoo lala hadlayo hoggaamiyaha ilaalinta loo qoondeeyey ama ku xigeen.

### Gacan ka hadal halis ah

46. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay la socdaan calaamadaha, oo ay dhici karto inay kamid yihiin calaamadaha caruurta ee khatarta ugu jirta, ama dhici karta iney ku lug leeyihiin, danbi aad u wayn. Kuwan waxaa ka mid noqon kara maqnaanshaha dugsiga oo bata ama kulliyadda, isbeddelka saaxiibtinimada ama xiriirka shakhsiyaadka ama kooxaha waaweyn, hoos u dhac weyn oo ku yimaada waxqabadka waxbarashada, calaamadaha waxyeellada ama isbeddelka ladnaanta, ama calaamadaha weerarka ama dhaawacyada aan la garanayn. Hadiyado aan la sharrixi karin cida laga heley ama haysasho alaabaad cusub ayaa sidoo kale noqon kara in caruurta ay u yimaadeen, ama ay la shaqeeyaan, shakhsiyaad dambiyo faraha kula jira oo ka tirsan dalad dambi ama burcad oo waxaa dhici karta inay ku jiraan khatar in la isticmaalo.

### Taageero iyo macluumaad dheeraad ah

47. Talo waaxeed What to do if you're worried a child is being abused: advice (Waxa la sameeyo haddii aad ka welwelsan tahay in ilmo lagu xad-gudbo: la-talinta) for practitioners (dhakhaatiirta) waxay ku siinaysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fahamka iyo aqoonsiga xadgudubka iyo dayaca. Tusaaleyaasha tilmaamayaasha suurtagalka ah ee tacaddika iyo dayacaadda ayaa lagu muujiyey taladaas oo dhan waxayna si gaar ah u caawin doontaa shaqaalaha dugsiga iyo kulyadda. Websaydka NSPCC wuxuu kaloo bixisaa macluumaad dheeraad ah oo faa'iido leh oo ku saabsan xadgudubka iyo dayaca iyo waxa la eego.

48. **Lifaaqa B wuxuu ka kooban yahay macluumaad dheeraad ah oo muhiim ah oo ku saabsan noocyada gaarka ah ee tacaddiga, isticmaalka iyo arrimaha ilaalinta. Hogaamiyayaasha dugsiyada iyo kulyadaha iyo shaqaalaha sida tooska ah ula shaqeeya carruurta waa iney akhriyaan lifaaqa B.**

## Waxa shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay tahay iney sameeyaan hadii ay walaacyo ka qabaan ilmo

49. Shaqaalaha la shaqaynaya carruurta waxa lagula talinayaa in ay ilaashadaan habdhaqanka '**halkan ayay ka dhici kartay**' halka ay ilaalintu khusayso. Marka ay ka

walaacsan yihiin daryeelka ilmaha, shaqaaluhu waa in ay had iyo jeer u dhaqmaan sida danta **ugu wanaagsan** ugu jirta ilmaha.

50. Haddii shaqaaluhu ay **wax walaac ah** ka qabaan daryeelka ilmaha, waa inay **islamarkaaba** wax uga qabtaan iyaga. Ka fiiri bogga 24 shaxda isku aadka ah taasoo sheegaysa hanaanka ay racayaan shaqaaluhu marka ay walaac kaqabaan ilmo.

51. Hadii shaqaaluhu ay qabaan walaac, waa inay raacaan siyaasada ilaalinta ururada oo waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa).

52. Dookhyada ayaa intaas kadib noqon kara:

- maaraynta taageero kasta oo ilmaha gudaha ah iyada oo loo marayo nidaamka taageerada xoola-dhaqatada ee dugsiga ama kulyadda
- samaynta qiimaynta caawinta hore.[15] ama
- samaynta u gudbinta adeegyada sharciga ah.[16] tusaale ahaan sida ilmuhu u baahan karo, baahan yahay ama uu dhibaataysan yahay, ama ay u badan tahay in uu dhibaato soo gaadho.

53. Hoggaanka ilaalinta loo idmaday (ama ku xigeenkiisa) waa inay mar kasta diyaar u noqdaan ka hadalka wixii walaacyo ah ilaalin. Hadii ay jiraan xaalado gaarka ah, hoggaanka ilaalinta loo idmaday (ama ku xigeenkiisu) aanay joogin, waa inayna ku iman dib u dhac talaabada munaasabka ah ee la qaadayo. Shaqaalaha waa iney la hadlaan xubin kamid ah kooxda maamulka sare iyo/ama ay talo waydiiyaan daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka. Xaaladahan oo kale, wixii talaabo ah ee la qaaday waa in lala wadaagaa hogaanka ilaalinta loo magacaabay (ama ku xigeenkiisa) sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.

54. Shaqaalaha waa iney kafakarin in xubin shaqalaaha kamid ah ama xirfadle kale uu qaado talaabo uuna lawadaago macluumaad muhiim u ah badbaadinta nolosha caruurta. Waa iney niyada ku hayaan in wadaagista xogta xili hore ay muhiim u tahay aqoonsiga, qiimaynta, iyo qoondaynta waxtarka leh ee bixinta adeegga ku haboon, hadday tani tahay marka koobaad ee ciladu soo muuqato, ama marka ilmo horay u yaqaaneen maamulka maxaliga ah ee daryeelka bulshada ee carruurta (sida ilmo u baahan ama ilmo leh qorshaha difaaca). Information sharing: advice for practitioners providing safeguarding services to (Wadaagista macluumaadka: la-talinta dhakhaatiirta bixiya adeegyada ilaalinta) children, young people, parents and carers (carruurta, dhalinyarada, waalidiinta iyo daryeelayaasha) waxay taageertaa shaqaalaha ay tahay

[15] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qiimaynta caawinta hore, bixinta adeegyada caawinta hore iyo helitaanka adeegyada ayaa ku jira Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta.)

[16] Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta) ayaa dhidibada u taagta in la hawlgalayaasha ilaalinta ay daabacaan dukumeentiga bilowga ah oo ay ku jiraan shuruudaha, oo ay ku jiraan heerka baahida, marka kiiska loo gudbiyo maamulka deegaanka ee daryeelka bulshada ee carruurta si loo qiimeeyo iyo adeegyada sharciga ee hoos yimaada qaybta 17 iyo 47. Saraakiisha dawlada deegaanka, oo kaashanaaya iskaashatadooda, waa iney abuuraan ayna soo dhajiyaan maamus maxali ah oo lagu samaynaayo qiimaynta. Maamuuska maxaliga ah waa inuu dajiyaa nidaamyo qeexan oo ku aadan qaabka kiisaska loo maaraynayo marka ilmaha loosoo gudbiyo maamulka deegaanka ee daryeelka arimaha bulshada ee caruurta.

inay go'aan ka gaaraan wadaagista macluumaadka. Taladan waxaa ka mid ah todobada xeer ee dahabiga ah wadaagida macluumaadka iyo tixgalinta la xidhiidha Xeerka Ilaalinta Xogta 2018 (DPA) iyo Xeerka Ilaalinta Xogta Guud ee UK (UK GDPR).

55. **UK iyo GDPR kama hortagaan wadaagista xogta sababo la xariira dhawrista badqabka carruurta iyo hormarinta fayaqabkooda.** Hadii ay jiraan wax shaki ah oo ka jira macluumaadka, shaqaalaha waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenka). Cabsida ku saabsan wadaagista macluumaadka waa inaan loo oggolaan inay hor istaagto baahida loo qabo ilaalinta iyo horumarinta daryeelka carruurta.

## Qiimaynta caawinta hore

56. Hadii caawinta hore ay ku habboon tahay, hoggaanka ilaalinta u idmaday (ama ku xigeenka) waxay sida caadiga ah u hoggaamin doontaa wakiilka hay'adaha kale iyo habdhismeedka ee qiimaynta gudaha hay'ada sida ay ku munaasab tahay. Shaqaalaha waxaa looga baahan karaa iney taageeraan shaqaalaha kale iyo xirfadlayaasha kale inta lagu jiro qiimaynta caawinta hore, ayagoo mararka qaar noqon kara hogaanka qiimaynta. Hagitaan dheeri ah oo ku saabsan qiimeynta wax ku oolka ah ee baahida caawimaadda hore waxaa laga heli karaa Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta. Markan oo kale waa in si joogto ah loo qiimeeyaa oo la eegaa in loo gudbiyo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka si ay ugu sameeyaa qiimaynta adeegyada sharciga hadii xaalada ilmuhu ayna kasoo raynin ama ay kasii darto.

## Qiimaynada iyo adeegyada sharciga ah ee daryeelka bulshada carruurta

57. **Meesha uu ilmuhu ku dhibaataysan yahay, ama ay u badan tahay inay dhibaato ka soo gaadho, waa muhiim in loo gudbiyaa maamulka deegaanka ee daryeelka bulshada carruurta iyo haddii ay kuhabboon tahay booliiska**, (eeg when to call the police: guidance for schools and (marka la wacayo booliiska: tusmada dugsiyada iyo) colleges (npcc.police.uk)) (kulliyadaha (npcc.police. uk)) ayaa isla markaaba la sameeyaa. Gudbinta waa iney raacaan hanaanka gudbinta deegaanka.

58. Qiimaynta daryeelka bulshada ee dawlada hoose waa inay tixgelisaa halka carruurta lagu waxyeeleynayo xaaladaha ka baxsan gurga[17], markaa waa muhiim in dugsiyada iyo kulliyadaha ay bixiyaan macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah iyada oo qayb ka ah habka gudbinta. Tani waxay usahlaysaa qiimayn kasta iney xisaabta kudarsato dhamaan cadaynta laheli karo waxayna fududaynaysaa qaab naqshadaysan oo loo xaliyo dhibaatadaas. Macluumaad dheeraad ah ayaad ka helaysaa halkaan: Contextual Safeguarding. (Ku tiirsanaanta Ilaalinta.)

59. Qalabka Report child abuse to your local council (U sheeg golaha deegaankaaga tacaddiga ilmaha) onlyaynka ah wuxuu hagayaa macluumaadka xiriirka daryeelka bulshada ee maamulka deegaanka ee khuseeya.

[17] Ka eeg working together (wada shaqayn) macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyeelada qoyska ka baxsan iyo bay'ada ka baxsan guriga qoyska

### Caruurta baahida qabta

60. Ilmaha baahida qaba waxa lagu qeexaa marka loo eegoXeerka Carruurta 1998sida ilmo aan laga yaabin in uu gaaro ama ilaaliyo heer macquul ah oo caafimaad ama korriin, ama caafimaadkiisa iyo korriinkiisa ay u badan tahay in ay si weyn u liidato ama ka sii daran tahay, iyadoo aan la bixin adeeg; ama ilmo naafo ah. Maamulka deegaanka ayaa looga baahan yahay inuu bixiyo adeegyada carruurta u baahan yihiin ee ujeeddooyinka ilaalintaiyo horumarinta daryeelkooda. Carruurta u baahan waxa lagu qiimayn karaa marka loo eego sida hoos timaada farqadda 17 ee  Xeerka Carruurta 1989.

### Caruurta la ildaran ama ay ubadan tahay inay la ildarnaadaan dhibaato daran:

61. Maamulka deegaanka, oo kaashanaya ururada kale sida ku habboon, waxa ku waajib ah in ay sameeyaan baaritaanfarqadda 47 ee Xeerka Carruurta 1998hoos yimaada haddii ay qabaan sabab macquul ah oo looga shakisan yahay in ilmuhu uu dhibaataysan yahay, mise ay u badan tahay in uu soo gaaro dhibaato weyn. Xog uruurintaas ayaa u sahlaysa iney go'aanshaan iney qaadaan iyo in kale wax talaabo ah si loo ilaaliyo badqabka loona hormariyo fayaqabka ilmaha waana in loo sheegaa marka ay jiraan walaacyo la xariira ilmo sixun loola dhaqmay. Tan waxaa ku jira dhammaan noocyada xadgudubka, dayaca iyo isticmaalida.

### Maxay tahay inay sameeyaan maamulka deegaanka?

62. Maalin gudaheed marka lasoo gudbiyo wargalinta, shaqalaaha arimaha bulshada ee maamulka maxalliga ah waa inuu xaqiijiyaa helitaanka wargalinta oo ay go'aan kagaaraa tallaabooyinka xiga ee laqaadayo iyo nooca warcelinta loo baahanyahay in labixiyo. Tani waxaa kamid ah go'aan gaarista in:

- ilmaha u baahan ilaalinta dakhsaha ah iyo talaabo degdega ah u baahan
- wixii adeegyo ah ee uu u baahan yahay ilmaha iyo qoyska iyo nooca adeegyada
- in ilmuhu baahi qabo, ayna tahay in qiimayn lagu sameeyo si waafaqsan faraqa 17 ee Xeerka Caruurta 1989. Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta) waxay bixisaa faahfaahinta hannaanka qiimaynta
- in ay jirto sabab macquul ah oo looga shakin karo in ilmuhu la il daran yahay mise ay ubadan tahay inuu ladaalaa dhacaayo dhibaato weyn, iyo in baaritaano ay khasab tahay in lagu sameeyo ilmaha lagu qiimeeyo si waafaqsan farqadda 47 ee Xeerka Caruurta 1989. Working Together to Safeguard (Ka wada shaqaynta ilaalinta) Children (Carruurta) waxay bixisaa faahfaahinta hannaanka qiimaynta, iyo
- in qiimaynada dheeriga ah ee takhasuska leh loo baahanyahay si looga caawiyo maamulka deegaanka go'aaminta nooca talalabada dheeriga ah ee laqaadayo;

63. Wargalinta waa in dabagal lagu sameeyaa haddii macluumaadkaan uu yahay mid billow ah.

64. Haddii shaqaalaha bulshada ay go'aansadaan iney sameeyaan qiimaynta sharciga, shaqaalaha waa inay sameeyaan wax kasta oo ay ku taageeri karaan qiimaynta (waxaa taageera hogaanka ilaalinta loo magacaabay (mise kuxigeenka) sida loogu baahdo).

65. Haddii, kadib gudbinta, xaalada ilmuhu aysan u muuqan mid kasoo raynaysa, wargalintu waa iney martaa habraacyada soosocda ee sii balaarinta qadiyada maxaliga ah si loo hubiyo in walaacyada laxaliyo lana, sida ugu muhiimsan, kor looqaado xaalada ilmaha.

## Ilaalinta diiwanka

66. Dhammaan walaacyada, doodaha iyo go'aannada lagaaro, iyo sababaha go'aanadaas loo cuskado, waa in iyagoo qoran diiwaanka la galshaa. Tani waxay sidoo kale ka caawisaa hadii/goorta wax cabasho ah oo kusaabsan qaabka kiiska ay sameeyeen dugsiga mise kuliyada. Macluumaadka waa iney ahaadaan kuwo qarsoodi ah meel ammaan ahna lagu kaydiyaa. Waa dhaqan wanaagsan in walaacyada iyo gudbinta lagu hayo fayl gaar ah oo ilaalinta ilmaha ee ilmo kasta.

Diiwaannadu **waa in** ay ku jiraan:

- guudmar cad oo dhammaystiran oo ku saabsan walaacyada
- faahfaahinta sida walaacyada loo daba galay ee loo xaliyay, iyo
- Cadaynta tallaabo kasta oo la qaaday, go'aannada la gaaray iyo natiijada.

67. Hadii laga shakiyo shuruudaha diiwaangalinta, shaqaalaha waa inay kala hadlaan hoggaanka ilaalinta loo idmaday (ama ku xigeenka).

## Maxay dhammaan arrimahan muhiim u yihiin?

68. Waa muhiim in caruurtu hesho caawinta saxda ah xilliga kuhabboon si looga hortago halisaha ilaalinta badqabka, loogana difaaco arimaha ugasii dari kara halisaha jira iyo hormarinta faya dhawrka ilmaha. Cilmi baarista iyo dib u eegista ku dhaqanka ilaalinta ilmaha deegaanka ayaa si isdaba joog ah u muujiyay khatarta ah in la qaadi waayo tallaabo wax ku ool ah.[18] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhaqanka ilaalinta ilmaha ee deegaanka ayaa laga heli karaa Working Together to Safeguard Children. (Ka wada shaqaynta ilaalinta Carruurta.) Tusaalayaasha tallaabooyinka liita waxaa kujira:

- fashilka tallaabo qaadashada iyo u gudbinta calaamada hore ee tacaddiga iyo daycaada
- diiwaan keydin liidata
- in la dhagaysan waayo aragtida ilmaha

[18] Qaadaa dhigista dib u eegista kiisaska halista ah waxaa laga heli karaa barta gov.uk/government/publications/serious-case- reviews-analysis-lessons-and-challenges

- in dib loo qiimayn waayo walaacyada marka xaaladda aysan kasoo rayn
- in aan lala wadaagin macluumaadka dadka saxda ah iyo hay'adaha dhaxdooda
- in macluumaadka si aad u gaabis u ah loo wadaago, iyo
- inaadan kucadaadin dadka u muuqda inaysan qaadayn talaabadii loo baahnaa.

## Waxay shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay tahay iney sameeyaan haddii ay qabaan walaacyo ilaalin ama ay jirto eedeyn kusaabsan shaqaale kale

69. Dugsiyada iyo koleejyada waa inay lahaadaan habab iyo habraacyo lagu maareeyo walaac kasta oo ilaalinaya ama eedaymo (iyadoon loo eegayn inta yar) ee ku saabsan xubnaha shaqaalaha (ay ku jiraan shaqaalaha saadka, mutadawiciinta, iyo qandaraaslayaasha).

70. Haddii shaqaalaha ay qabaan walaac ilaalin ah ama eedayn waxyeello ama khatar u ah carruurta waxaa laga sameeyaa xubin kale oo ka tirsan shaqaalaha (oo ay ku jiraan shaqaalaha sahayda, mutadawiciinta, iyo qandaraaslayaasha), markaa:

- waa in tan loo gudbiyaa maamulka macallimiinta ama maamulaha
- meesha ay jiraan walaacyo/eedeymo ku saabsan maamulka baraha ama maamulaha, waa in tan loo gudbiyaa barasaabka, gudoomiyaha gudida maamulka ama dib gaystaha dugsiga madaxa banaan, iyo
- Haddii ay dhacdo walaac/eedeyn ku saabsan maamulaha, oo uu maamuluhu sidoo kale yahay mulkiilaha kaliga ah ee dugsi madax bannaan, ama xaalad ay jirto khilaaf dan ku jirto oo ku saabsan in arrinta loo sheego maamulaha macallimiinta, taas waa in si toos ah loogu wargeliyaa Maamulka deegaanka ee loo magacaabay sarkaal (-yaasha) LADO(yada). Faahfaahinta LADO-ga deegaankaaga ayaa si fudud looga heli karaa webseedka maamulka deegaankaaga.

71. Haddii shaqaalaha ay qabaan walaac ilaalin ah ama eedaymo ku saabsan xubin kale oo shaqaale ah (oo ay ku jiraan shaqaalaha sahayda, mutadawiciinta ama qandaraaslayaasha) oo aan buuxin heerka waxyeellada, markaa tan waa in lala wadaagaa si waafaqsan siyaasadda walaaca heerka hoose ee dugsiga ama kulliyadda. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa Qaybta afraad ee hanuunintan.

## Waxa shaqaalaha dugsiga ama kuliyada ay tahay iney sameeyaan haddii ay walaacyo kaqabaan xeerarka ilaalinta caruurta ee kajira dugsiga ama kuliyada

72. Dhammaan shaqaalaha iyo mutadawiciinta waa iney dareemaan iney awood u leeyihiin iney kor u qaadaan walwalka kusaabsan dhaqanka liita ama aan badbaadada lahayn iyo guul-darrooyinka ka iman kara ilaalinta dugsiga ama kulyadda oo ay ogaadaan in walaacyadan ay si dhab ah u qaadan doonaan kooxda hoggaanka sare.

73. Habraacyo ku habboon kashifida waa in loo dajiyaa si walaacyadan oo kale loogala hadlo kooxda hoggaanka sare ee dugsiga ama kulyadda.

74. Marka xubin kamid ah shaqaalaha uu daremo inuusan awoodin sheegista khatar ka imaanaysa qofka ay ushaqeeyaan, ama uu dareemaayo in walaacyadiisa rasmiga ah aan waxba laga qabanayn, marinno kale oo ay wax ku kashifi karaan ayaa u furan:

- talooyinka guud ee ku saabsan siraha waxaa laga heli karaa barta whistleblowing (Kuwa wax soo sheega) ee shaqaalaha
- NSPCC Whistleblowing Advice Line (Khadka La talinta Kuwa wax soo sheega ee NSPCC) Waxaa loo heli karaa sidii wadiiqo kale oo loogu tala galay shaqaalaha aan dareemeynin inay kor u qaadi karaan walaaca ku saabsan guuldarada ilaalinta carruurta gudaha, ama ka walaacsan habka walaac loo maareeyo dugsigooda ama kulliyaddooda. Shaqaalaha waxay wici karaan 0800 028 0285 – waxaana khadka la heli karaa 08:00 ilaa 20:00 Isniinta ilaa Jimcaha, iyo 09:00 ilaa 18:00 dhammaadka todobaadka. Ciwaanka iimaylka waa help@nspcc.org.uk[19]

[19] Beddelka taas, shaqaalaha waxay warqad u soo qori karaan: Ururuka Qaran Kahortaga Dhibaatada loogaysto Caruurta (NSPCC), Weston House, 42 Curtain, Road, London EC2A 3NH.

## Talaabooyin ku aadan meelaha ay kajiraan walaacyada kusaabasan ilma yar




[1] Xaaladaha ay sidoo kale ku lug leeyihiin walaac ama eedayn tacaddi ka dhan ah xubin shaqaale, eeg qaybta afraad ee tusmada.
[2] Caawinta hore waxay la dhigan tahay in la bixiyo taageero isla marka ay dhibaatadu soo baxdo mar kasta oo nolosha ilmaha ah. In ilmuhu ka faa'iidaysanayo caawinta hore oo la iska kaashaday, qiimaynta caawinta hore ee wakaaladuhu iska kaashadaan waa in la sameeyaa. Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Ilaalinta Carruurta) waxay bixisaa tusmo faahfaahsan oo ku saabsan hannaanka caawinta hore.
[3] Gudbinta waa inay raacaan hanaanka udagsan ee kuqoran dukumieetiga tixraaca maxalliga ah iyo hab maamuuska qiimaynta ee maxalliga. Eeg Working Together to Safeguard Children. (WKa wada shaqaynta Ilaalinta Carruurt.)
[4] kucad Xeerka Caruurta ee 1989, maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa iney siiyaan adeegyada caruurta baahida qaba sababo laxariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Caruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan qeybta 17 ee Xeerka Caruurta 1989. Sida ku cad farqadda 47 ee Xeerka Caruurta 1989, marka maamulka deegaanka uu hayo sabab macquul ah oo ay uga shakin karaan in ilmo la dhibtoonaayo ama laga yaabo inuu khatar ugu jiro dhibaato weyn, waxaa masuuliyad kasaaran tahay iney samayso baaritaanno si loo go'aansado in aan qaadayno tallaabo si loo ilaaliyo badbaadada ilmaha korna loogu qado fayo qabka ilmaha. Faahfaahin buuxda waxay ku jirtaa Working Together to Safeguard Children. (WKa wada shaqaynta Ilaalinta Carruurt.)
[5] Arintaan waxaa ka mid noqon kara Dalbashada Difaaca Dadaga (EPO).